

Gelista Barta Bixiyaha ee WA Compass

Barta Daryeel bixiyaha ee WA Compass waa aalad onlayn ah, oo xogta kaydisa taasoo la furay 2019 waxaana adeegsata Waaxda Ruqsad bixinta si ay u maareeyso una bixiso xogta bixiyaasha daryeelka carruurta iyo waxbarashada carruurnimada aasaasiga ah, iyo sidoo kale adeeg bixiyaasha Qoyska, Saaxiibada, iyo Dariska (FFN). Bixiyaha Waxbarashada aasaasiga ah iyo (Family, Friends, and Neighbor FFN) ayaa uga warami kara shaqaalaha DCYF xaaladaha xaruntooda iyo daryeelkooda (bixiyaasha FFN), sidoo kalena ugu soo diri kara codsiyada kaladuwan si dib u eegis ay ugu samayso ayna go'aan uga soo saarto wakaaladu.

Gelitaanka Barta Daryeel Bixiyaha ee WA Compass waxaa lagu saleeyaa gelitaanka gaarka ah, iyadoo qof kasta uu leeyahay ciwaan iyo baasweer u gaar ah, waxayna u sahlayaa daryeel bixiyaasha inay adeegsadaan xogtooda gaarka ah ee gelitaanka si ay u galaan Barta Daryeel bixiyaha ee xarun kasta ama ciwaanka ay siiyeen shaqaalaha bixinta ruqsada iyo ruqsad dhaafka daryeelka carruurta (isticmaaleyaasha ayaa u baahan doona Lambarka Aqoonsiga STARS oo ay bixiso AaladaMacluumaadka Waxbarashada iyo Diiwaangelinta la maareeyay (Managed Education and Registry Information Tool MERIT) kahor inta aysan gelin nidaamka).

Gelitanaka barta Daryeel Bixiyaha ee WA Compass waxay u sahlayaa:

- In daryeel bixiyaasha codsanaaya ay ku soo diraan codsiga ruqsada daryeelka carruurta qaab onlayn ah
- In bixiyaasha daryeelka carruurta ee ruqsada iyo shahaadada leh ay akhriyaan ayna buuxiyaan Warbixinnada Kormeerka ee cusub
- In bixiyaasha daryeelka carruurta ee ruqsada iyo shahaadada haysta ay arkaan taariikhii hore ee ruqsada iyo warbixinta kormeerka
- In Daryeel bixiyaasha Qoyska, Saaxiibada, iyo Dariska (FFN) ay ka waramaan xaaladhooda daryeelka iyo xubnaha qoyska la nool
- In bixiyaashu ay codsadaan deeqaha ay u qalmaan
- In bixiyaashu ay ku soo diraan codsiyada si ay dib u eegis ugu samayso ayna go'aan ka gaarto wakaaladu kuwaasoo horey loogu gudbin jiray qaab waraaq ah


Fiiri gaar ah: Haddii aadan marna horey u gelin Barta Daaqada Daryeel Bixiyaha ee WA Compass, ama aad dooneyso inaad noqoto daryeel bixiyaha daryeelka ilmaha oo ruqsad leh, fadlan la xiriir Taageerada Barta Bixiyaasha Daryeelka ee WA Compass si lagu caawiyo. Lifaafa “Forgot Your Password (Iloowday baasweerkaga)” ayaa keliya u shaqeynaaya shaqsiyaadka horey u galay barta.

Si aad u hesho Taageerada Barta Daryeel Bixiyaha, iimeelka dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov ama wac 1-866-627-8929.

Si aad u gasho Barta Daryeel Bixiyaha ee WA Compass, Raac Talaabooyinka Hoose


1. Guji [lifaafa Barta Daryeel Bixiyaha WA Compass](#) si aad u gasho bogga gelitaanka onlaynka ah.






2. Geli Ciwaanka isticmaalaha godka Username.

Fiiro gaar ah: Magaca isticmaalaha waa ciwaanka iimeelka waxaana lagu baxshay lifaaqii orjinaalka ah ee iimeelka markii ciwaanka gelitaanka ay samaysay wakaaladu.



3. Geli Baasweerkaaga godka Password.

Fiiro gaar ah: Haddii aadan xasuusan baasweerkaaga, ama aadan abidkaaba gelin Barta Daryeel Bixiyaha ee WA Compass, fadlan la xiriir kooxda Taageerada Barta Daryeel Bixiyaha oo aad ka helayso dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov si lagu caawiyo.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

WA Compass Provider Portal


Username

Password

[Forgot Your Password?](#)

If you need help logging into your account, please contact
dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov or call 866-627-8929.
[DCYF Security & Privacy Policy](#)

4. Guji batoonka “Login (Gal)” si aad u sii wado.



Washington State Department of
CHILDREN, YOUTH & FAMILIES

WA Compass Provider Portal


Username

Password

[Forgot Your Password?](#)

If you need help logging into your account, please contact
dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov or call 866-627-8929.
[DCYF Security & Privacy Policy](#)


5. Marka aad gasho Barta Daryeel Bixiyaha ee WA Compass, Bogga Hore ayaa soo baxaaya:



6. Bogga Hore waa meesha ay ka galayaan daryeel bixiyaashu si ay u arkaan Warbixinnada Kormeerka, shahaadooyinka ruqsada, ayna sidoo kale codsiyada uga dirayaan waaxda.

Fiiro gaar ah: Xaashiyaha tilmaamaha ayaa laga heli karaa batoonka Help/Tip Sheets (Xaashiyaha Caawimaada/Tilmaanta) ee geeska kore ee midig ee Bogga Hore waxaadna ka helayaa tilmaamo ku aadan samaynta shaqooyin kaladuwan iyo codsiyada lagu diri karo barta (sida gelinta taarikhaha sixitaanka Warbixinta Kormeerka, daabacida shahaadada ruqsada, ama codsashada shardi dhaaf ama isbadel).





7. Si aad u aragto xaashiyaha tilmaanta, guji batoonka Tip Sheets. Liiska buuxa ee xaashiyaha tilmaamaha ee la heli karo ayaa lasoo bandhigi doonaa (xaashiyaha tilmaanta ayaa lagu heli karaa Ingiriis, Isbaanish, iyo Soomaali):



8. Guji lifaaqa buluuga ah si aad u hesho nuqulka xaashida tilmaanta ee aad dooneyso inaad aragto:



Licensing Tip Sheets

- Requesting a Variance
 - English
 - Español
 - Soomaali
- Requesting a Waiver
 - English
 - Español
 - Soomaali
- Adding a Program Description
 - English
 - Español
 - Soomaali
- Changing your Doing Business As Name
 - English
 - Español
 - Soomaali
- Changing your Schedule
 - English
 - Español
 - Soomaali

9. Xaashida tilmaanta ee la doortay ayaa ku furmayso PDF.

PROVIDER PORTAL – REQUESTING A VARIANCE TIP SHEET

Requesting a Variance

Definition of Variance: Official approval from the department allowing an early learning program to achieve the outcome of a rule or rules in WAC in an **alternative way than described** due to the needs of a **unique or specific program approach or methodology**.

For Provider Portal support, Contact: dcyf.providerportal@dcyf.wa.gov or 1-866-627-8929.

To Request a Variance in the Provider Portal, Follow the Steps Below

1. From the homepage of the Provider Portal, click on the “Request Changes” button.

Child Care Center Jen ▾LicensingGrant InformationHelp ▾Logins ▾

10. Haddii shaqsiyaadku doonayaan inay arkaan Barta Daryeel Bixiyaha ee WA Compass oo ku qoran luuqad kale, guji dookhyada Select Language (Doo-ro Luuqad) oo ku jira geeska kore ee midig kadibna dooro luuqada aad dooneyso:





11. Si aad uga baxdo Barta Daryeel bixiyaasha ee WA Compass, guji lifaaqa Logout (Kabax) oo ku qoran geeska kore ee midig ee bogga:

